

Dalka Soomaaliya, Hayadda Caalamiga ah ee Laanqeyta Cas (ICRC) oo kaashaneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay ka jawaabtaa baahida dhibanayaasha dagaalada oo inta badan ay sii adkeeyaan masiibooyinka dabiiciga ah. Waxay bixisaa gargaar deg deg ah iyo taageero waqtiga fog ah oo loogu talagaley isku filnaashaha bulshada. Waxay horumarisaa ayna kormeertaa Xeerka Caalamiga ee Aadamimada islamarkaana booqaataa maxaabiista.

## **Dulmar**

ICRC-da waxay ka shaqeyneysey Soomaaliya tan iyo 1977kii markaasoo ay ka jawaabeysey qalalaasihii ka dhashay dagaalkii u dhexeeyey Itoobiya iyo Soomaaliya. Laga soo bilaabo 1982dii, ICRC waxay sii joogteysey joogitaankeeda Soomaaliy iyadoo ergedeeduna ay ku sugnaayeen magaalada Nairobi tan iyo 1994kii.

Soomaaliya oo ah mid ka mid ah howgallada ugu waaweyn ee ICRC-du ay ka wado caalamka waxaa saameyn qoto dheer ku yeeshay taboneeyo sanno qalalaase aadaminimo oo ka dhashey khilaafka gudaha ah iyo masiibooyinka cimilada ay sababtey. 18 sanno oo dagaal sokeeye ah ka dib, dagaal u dhexeeya xoogaga dowlada ku meelgaarka ah oo ay taageerayaan ciidamada midowga Afrika (AMISOM) iyo mucaaradka hubeysan ayaa Soomaaliya ka soconaya sanadkii sedexaad tasoo dhalisey walaac ku saabsan nabadgelyada bulshada.

## **Daryeel Caafimaad**

Si loo hubiyo in dadka ku dhaawacma dagaalada ay helayaan daryeel caafimaad oo haboon, ICRC-da waxay taageertaa labo cisbitaal oo ka shaqeeya gargaarka deg deg ah ee ku yaala magaalada Muqdisho iyo 43 xarumo caafimaad oo ah daryeelka caafimaadka aasaasiga ee hooyada iyo dhallaanka (labo iyo toban ka mid ah ay yihiin xarumo caafimaad oo wareega). Gargaar deg deg ah oo aan joogta ahayn ayaa la bixiyaa hadii ay jiraan dhaawacyo fara badan oo la keeno xarumaha caafimaadka ee Bisha Cas iyo goobaha kale ee caafimaad ee Soomaaliya ku yaala.

## **Sugnaanta Cuntada iyo Noloshaha**

Sanadkii 2011-ka, Soomaaliya waxay la kulantay mid ka mid ah wax soo saar beereedkii ugu xumaa muddo dhowr sanno ah, taasoo sababtey barakac balaaran iyo dhimasho badan taas oo ICRC-da ku qasabtay inay fuliso howgal ballaaran oo cunno qeybin ah. Tan iyo xiligaas, xaalada sugnaashaha cunnada ayaa si weyn u soo hagaagtey. Laakiin, baaxada qalalaasaha awgeed, qeybo badan oo ka mid ah bulshada Soomaliyeed ayaa weli ah kuwa nugul gaar ahaan inta lagu jira xiligan gaajada “Hunger Gap” ( Inta lagu jiro bilaha ka horeeya xiliga beer goosashada ee April ilaa Julaay). Sidaa awgeed, ICRC-da waxay sii wadey inay ka jawaabto baahida nafaqo ayadoo raashin badan ka qeybisey Koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo deegaanada Puntland bilihii April iyo May 2012.

Toboneeyo sano oo colaad iyo masiibooyin daabiici ah ayaa waxay si xun u aafeeyeen awooda isku filnaashaha dadka dhaqaalo ahaan. Sidaa darteed, ICRC-da waxay sanado badan diirada gargaarkeeda saartey inay fuliso mashaariic la xiriira wax soo saarka beeraha, kalluumaysiga, biyaha iyo abuurida fursado shaqo (Cash for work) looguna talagaley inay dib u soo celiyaan ama kobciyaan noloshaha iyo sugnaanta dhaqaale ee bulshooyinka ay aafeeyeen dhibaatooyinkaas.

Sanadii 2011-ka, ku dhowaad, 1,300,000 oo qof ayaa ka faa’ideystey mashaariic loogu talageley in lagu kobciyo isku filnaashaha bulshada hayadduna waxay ku tala jirtaa inay caawiso tiro intaa la eg oo dad ah sanadka 2012.

## **Booqashada Maxaabiista iyo Horumarinta Xeerka Caalamiga ee Aadaminimada**

ICRC-da waxay raadisaa inay wada hadal lagasho dhamaan kooxaha kala duwan ee dagaalada ku lugta leh kuwaasoo quseeya hab dhaqanka colaadaha. Iyadoo ka jaan qaadeysa doorkeeda la socodka dhexdhexaadka, eexash la’aanta iyo xorta ah, ICRC-da waxay dib u bilowdey booqashada maxaabiista ayadoo ka bilowdey Muqdisho si ay ula socoto sida loola dhaqmo maxaabiista iyo xaaladaha xabsiyada gaar ahaan shaqsiyaadka u xiran dagaalada awgood.

ICRC-du waxay si dhow ula shaqeysaa isla markaana siisaa taageero muhiim ah Ururka Bisha Case e Soomaaliyeed. Marka laga soo tago barnaamijyada wada jirka ah ee caafimaadka, labada hayadood waxay gacan ka geystaan dib u mideynta qoysaska ay kala geeyeen dagaalada iyo masiibooyinka dabiiciga ah iyagoo isticmaalaya hanaanka fariimaha Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas, website-keeda isku xirka qoysaska iyo warbaahinta raadiyaha.